{«DateLetterGenerated»}

Degane Qaali ahoow,

Meesha aad ku nooshahay ee {«Street, City, State Zip»} waxaa la ogaaday in ay leedahay heerar aan ammaan ahayn oo macdanta lead-ka ah taasi oo qayb ka noqotay sababaha sumowga ee macdanta lead-ka. Soo-gaadhista saamaynta macdanta lead-ka waxay dhaawici kartaa maskaxda iyo hab-dhiska neerfaha, dib u dhac u keeni karta korriinka iyo horumarka, waxayna sababi kartaa dhibaatooyinka waxbarashada iyo hab-dhaqanka iyo sidoo kale dhibaatooyinka dhanka maqalka iyo hadalka.

Sababta ugu badan oo ay saamaynta soo-gaadhista lead-ka ay carruurtu ku gaadho waa rinjiga leh macdanta lead-ka oo xumaaday (siigo noqday) ee guryihii hore ee la dhisay 1978 kahor. Ilaha kale ee suurtogalka ah ee keeni kara soo-gaadhista waxyeellada lead-ka waxaa ka mid ah carrada, biyaha, iyo alaabta lasoo iibsado.

Haddii ilmo da'diisu ka yar tahay 6 sano uu ku nool yahay gurigaaga ama uu guriga joogo wax ka badan lix saacadood toddobaadkii, Waaxda Caafimaadka Ohio waxay ku talinaysaa in ilmuhu uu baadhitaan dhiig oo ku qaado dhakhtar ama adeeg bixiye kale oo daryeel caafimaad si loo hubiyo in isaga/iyada uusan soo-gaadhin saamaynta waxyeellada lead-ka.

{«HDname»} ayaa amar ku siiyay mulkiilahaaga mulkiilaha guriga inuu hagaajiyo dhibaatooyinka lead-ka, laakiin isagu/iyadu haday diidayaan inay sidaas sameeyaan. **Sidaas darteed, sharciga Ohio wuxuu sheekaya in qof kasta oo ku nool gurigaas waa inuu guuraa sababtoo ah waxaa lagu dhawaaqay in aysan ammaan u ahayn in dadku ku noolaadaan halkaas. Waxay gaar ahaan khatar ugu tahay carruurta ka yar 6 sano iyo sidoo kale haweenka uurka leh.** Calaamad digniin ah ayaa lagu dhejiyay guriga, waana sharci darro in calamaad laga qaado. ODH ayaa dabagal la socod ah ku samayso guryahan si ay u hubiso in calaamadaha digniinta ay wali ku dhejisan yihiin, iyo in cidina aanay ku noolayn guryahaas.

Waxaad u baahan tahay inaad raadsato guri kale oo aad ku noolaato (guri la dhisay 1978 ka dib haddii ay suurtogal tahay, maadaama ay guryaha cusub aysan lahayn khatar aad u badan marka la barbarhdigo guryihi hore). Bulsho badan oo deggan Ohio ah ayaa leh ururo adeegyo bulsheed ama ilo kale oo bulsho kuwaas oo kaa caawin kara inaad hesho meel kale oo aad ku noolaato. Waxaad arki kartaa liiska guryaha ee agagaarkaaga ku yaala si aad uga fogaato sababtoo ah waxay sidoo kale leeyihiin dhibaatooyinka macdanta lead-ka (waxaa laga heli karaa shabakada ODH ee http://www.odh.ohio.gov/pbhazproperties).

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan ogeysiiskan, ama ku saabsan sida ilmaha looga baadho sumowga macdanta lead-ka, ka wac {«HDname»} lambarka taleefonka {«HDPhone»}).

Si daacad ah,

{«HDRepresentativeName»}
{«HDRepresentativeTitle»}
{«HDName»}